# Tusaalo Logutalagaly Waalidka: Waxyaabaha Loobahanyahay in aad Ogaato

**(A Parent Guide to Testing: What You Need to Know—Somali Version)**

Ardaydu waxa ay qaataan imtixaano farabadan. Labada ogu “wayni” waa imtixaanka gobolka ee qiimaynta (Minnesota Comprehensive Assessments, MCAs) iyo imtixaanka xaga kartida ama farsamada (Basic Skills Test). Sababta ay labadaa imtixaan ugu muhiimsanyihiin iyo sidii aad ilmahaaga uga caawin lahayd in uu natiijo fiican keeno.

## Imtixaanka Lagu Cabiro Fahmada ee Gobolka Minasoota.

Kuwaase waa imtixaanaad xaga akhriska iyo xisaabta ku saabsan. Skuulada minasoota waxa sanadkiiba ardayda ku jirta fasalda 3-8 iyo iskuulka sare ay ka qaadaan imtixaan. Imtixaanadaasina waxa lagu qiyaasa arday waliba heerka uu ka taaganyahay cabiraada gobolka.

Skuuladau waxa ay imtixaanaadkaa uga qaadan ardayda si ay u ugaadan heerka wax fahamka iyo xirfadaha (concepts & skills). Marka ilmahaagu uu qaato imtixaankaas, waxa laguu soo dirayaa warbixin ku saabsan natiijada iyo hor umarkiisa. Warbixintu:

- waa mid ku wargalinaysa natiijada ilmahaaga xaga akhriska iyo xisaabta.
- heerka ilmahaagu taaganyahay marka lagu cabiro ardayda kale ee gobolka.

Imtixaanka akhriska waxa ah sheeko la sameeyay iyo kuwo kaleba sida gabayga, sheeko yar ama warbixin. Xaga xisaabta, ardaydu waxa ka shaqeeyaan su’aalo kala gadisan oo u baaahan xirfad iyo cabiraad ah dhinaca khibrada.

Ardaydu kuma barmuusaan kumana dhacaan imtixaanka gobolka ee qiimaynta. Laakiin waalidka iyo skuulka ayaa wxa ay ka korodsadaan warbixin sida ardaydu ku yihiin akhriska iyo xisaabta. Waxa aad warbixinta ku ogaan kartaa hor umarka ilmahaaga. Skuulkuna waxa uu warbixinta u isticmaali karaa sidii ay wax u bari lahaayeen ardayga

### Ka caawi ilmahaaga sidii uu isugu diyaarin lahaa imtixaanaadka

Waxbadan ayaad ka qaban kartaa si uu ilmahaagu u keeno ama u keento natiijo fiican.

**Guud ahaan:**

- isku day in ilmahaagu la sii qabsado habka imtixaanka. Waxa aad iskuulka ka codsan kartaa qoraalada imtixaanaad hore (sample).
- ku dhiiri gali ilmahaaga in uu ka qayb qaato tababarka isku diyaarinta imtixaanka eee lagu qabto skuulka iyo gurigaba.
- Isku day in ilmahaaga hore u seexiso si uu hordo fiican u helo iyo qureec fiican oo nafaqo leh imtixaanka ka hor.

**Akhriska**

- Isku day in aad u akhrido ilmahaaga adiga oo ku dhiiri galinaya in uu kuu akhriyo.
- Ku dhiiri gali ilmahaaga in uu isku dayo isu gaynta erayada kala baahsan iyo in oo ka jawaabo su’aalaha ku qoran maqaalda (news paper)

**Xisaabta**

- ku dhiiri galay ilmahaaga in uu isticmaalo xisaabta. Isku day in uu ku barto xisaabta isaga oo isticmaalya alaabta dukaanka lagasoo gado, adiga oo ka caawinaya in uu isticmaalo waxyaabhaa ku yaal maqaalda iyo waxyaabaha laga sameeyo cunada.
- Waxa aad sameeysaa ciyaaro ku lug leh numbaro ku lu leh xisaabaadka.



© 2007 Minnesota Parent Center, MN PIRC, a project of, PACER Center • 8161 Normandale Blvd, Minneapolis, MN 55437-1044
952.838.9000 Voice • 800.537.2237 MN Toll-free • 952.838.0190 TTY • 952.838.0199 Fax • mnpirc@PACER.org • www.PACER.org/mpc

## Imtixaanka qiimaynta kartida iyo MCA-II/ Grad Tests

Gobolka minasota ardaydu dhamaan waa in ay qaataan dhawr imtixaan oo kala dambeeya akhrinta, xisaabta, iyo qoraalka si ay u qalin jabiyaan. Ardayda qalin jabin doonta sanadka 2009 waxa ay qaadan doonaan imtixaanka qiimaynta kartida iyo khibrada (basic skills test), ardayda qalin jabin doonta sanad kabacdina waxa ay qaadan doonaan imtixaanka MCA-II/GRAD. Ardaydu imtixaankaa dib ayay uqaadan karaan hadii ayna ku guulaysan marka u horaysa. Waalidka waxa loo dira natiijada imtixaanka ee ilmahooda.

Waxa ay imtixaanadaasi u fasaxaan in ay ardaydu ku muujiyaan aqoontooda iyo kartidoodaba. Waana hab u fiican gobolka Minnesota marka loo eego waajibaadka ka saaran ardayda. Sharciga dawlada dhexe kasoo baxay ee loo yaqaan ilmo laga tagayaa majiro (No Child Left Behind) ayaa iskuulada faraya in ay aradyda la gaadsiiyo heer qiyaasan. Natiijada imtixaankaasina wxa ay muujiyaan skuuladu fuliyeen waajibkoodii iyo in kale. (waxad fiirisaa 'waa maxay hor umarka sanadka)

### Ka caawi ilmahaaga isu diyaarinta imtixaanada.

Waalid ahaan, waxa aad ilmahaaga u caawin kartaa siyaabo badan. Waxa ka mid ah:

- Meel ilmahaagu ku akhristo u diyaare.
- Ku dheeri gali in ilmahaagu uu yeesho wakhti go'an uu akhristo kana shaqeeyo wixii u baahan in guriga lagaga shaqeeyo (homework).
- Ku dheeri galay in uu ilmhaagu akhristo maqaalda (newspaper) iyo buugaagta.
- Ku dheeri galay ilmahaagu in uu isticmaalo wax ku lug leh xisaabta..

## Suaalo?

Wax su'aal ah miyaad ka qabtaa xaga imtixaanada? Waxa aad la hadli kartaa maamulha iskuulka uu ilmahaagu dhigto. Waxa kale oo aad soo wici kartaa xarunta waalidka minasoota (Minnesota Parent Center). Telafoonkuna waxa weeyaan 952-838-9000 ama 800-532237 PACER (waa bilaash gobolka gudihiisa)

Xarunta waalidka minasoota waxa ay waalidka ka caawisaa kuna dheeri galisaa ka qayb qaadashada waxabarshada ilmahooda. Waxa kale oo ay dheeri galiyaan sidii dad waynuhu ugu diyaarin lahaayeen caruurtuda xaga waxbarashada. Kooxaha la shaqeeya ururka ayaa kaa caawin karaa su'aalaha ku saabsan xaga waxabarshada. Shaqsiyaadka la shaqeeya ururka oo ku hadla afaf kala gadisan ayaa waxa aad ka helaysaa warbixin lagu turjumay afaf kala gadisan sida, af Somaaliga oo kale. Waxa kale oo aad ka helaysaan kulan (workshop) ah warbixin ku saabasan sida No Child Left Behind sharciga ah.

*Minnesota Parent Center, Xarunta waalidka minasoota waxa weeyaan barnaamij kamid ah PACER Center, inc., wasarada waxbarashduna ay bixisay dhaqaalha.*

*PACER waa urur gobolka minasoota ah. Waxana ay taageeraan xuquuqda xaga waxbarshada ee caruurta laxaadka la'a iyo kuwa aan la'aynba. Waxa ayna u fidiyaan ama bixiyaan warbixin, waxqabad shaqsiyeed, iyo qoraal akhbaar ah iyo waxyaabo kale oo dheeraad ah.*